Warbixin sanadeedka 2006/07

Homes for Islington
improving housing through partnership

TRANSLATION AVAILABLE

Stonewall DIVERSITY CHAMPIONS

Five Star Health & Safety Management System Audit
★★★★★ Awarded 2006
BRITISH SAFETY COUNCIL

INVESTOR IN PEOPLE

CHARTER MARK
CUSTOMER SERVICE EXCELLENCE

Mudane ama Marwo

Ku soo dhowow Warbixin sanadeedka Guryaha Islington (HFI) ee 2006/2007. Waxaanu dhamaystiranay sanadkii sadexaad ee aanu halkaan ka shaqeeynay. Waxaana uu ahaa sanad aanu qabanay howlo fara badan oo wanaagsan iyo horumar aanu gaarnay.

Howlaha dhismayaasha waaweyn iyo hagaajinta ah ee aanu ka qabanay degmada Islington waxay wax ka badaleen nolosha iyo guryaha dadka ku nool halkaan degaankaas. Waxaanan sidoo kale u dhisnay Musqulo cusub, kushiino iyo daaqado guryahaas– iyo daraasaadkii aanu sameeynay waxaa nooga muuqaday in dadka intiisa badani ay raali ka yihiin howlaha aanu u qabano. Sanadka intii uu socdayna waxaanu si aad ah ula shaqeeynay heshiislayaal kale oo shaqada naga caawiyay, iyo sidoo kalena si lagu hubiyo in la soo buuxiyo habka sare ee la doonayo in wax loo qabto iyo in lagu qabto howlaha shaqada miisaaniyada sanadka ee loo qorsheeyay.

Waxaana uu ahaa sanad aanu sidoo kale qabanay howlo kale oo fara badan. Waxaanu sameeynay koox guur guurta ah oo xalisa dhibaatooyinka ka soo horjeedka bulshada ee dhaca saacadaha ka baxsan xiliga shaqada, sidoo kale waxaanu sameeynay kooxo qaada qashinka aan loo baahnayn ee waaweyn ee guryaha banaankooda la dhigo si markiiba loo nadiifiyo, sidoo kale waxaanu wax ka qabanay inaanu sameeyo howl weyn oo lagu soo daabacay buug la siiyay dadka degaanka degan iyo waxaanu si buuxda u qabanay dhamaanba xadkii shaqooyinka ee aanu horay u dajisanay ee ahaa dayactirka dhismayaasha iyo soo aruurinta ijaarka iyo qarashyada howlaha.

Waxaanu la shaqeynaynaa bulshada degaanka sidii looga dhigi laha dhismayaasha kuwo nadiif iyo nabadgelyo leh. Waxaanu sido kale la shaqeeyna booliiska, kounsilka iyo hayadaha kaleba si looga hor tago ficilada ka dhanka ah bulshada degaanka ku nool iyo waxaanu sidoo kale sameeynay barnaamijka shaqo geynta dadka shaqo la'aanta ah ee ku nool degaanka iyadoo midaasi ay qeyb ka tahay howlaha waaweyn ee hada ka socda degaanka.

Gudiga Maamulka ee HFI waxa uu si fiican weli u sii wadaa maamulka shirikada iyadoo ay labo gudi hoosaad ay u sii wadaan iyaguna maamulka hoose oo ay sii hagaajiyaan shirikada. Iyagoo hagaajinaya nolosha dadweynaha ku nool guryaha HFI oo dhanba, iyagoo ku daraya dadweynahaas dhiibida taloyinka lagu shaqeeynayo.

Waxaad ka heli doonaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan wixii aanu qabanay sanadkii tagay halkaan. Waxaanu hada horay u sii eegaynaa mustaqbalka iyo fursado cusub oo aanu ku dhisno dhismayaal cusub oo ay leeyihiin dadweynaha degaanka.

Waxaana mahad fara badan aan u soo jeedinaya maamulayaalka kale howlahoodii iyo shaqadii badnayd ee ay qabteen. Sidoo kalena waxaan halkaan uga mahad naqayaa Gudoomiyaha Gudiga, Eamon McGoldrick iyo shaqaalahiisu sida wanaagsan ee ay howsha wax uga qabteen.

Ann Lucas
Gudoomiyaha Guud ee

Guryaha Islington

Horumarka

2007 waxa uu noqon doona sanad aad muhiim ugu ah Guryaha Islington (HFI). November, Qolada Guryaha Baarta ayaa soo noqon doonta oo baari doona guryaha iyo howlaha aanu ka qabano. Waana furaha ugu muhiimsan in guryaha Islington HFI ay helaan mahadnaqa howlaha ugu fiican "sadex xidigood" ka dib marka baaritaankaasi dhamaado. Midaasina waa tilmaan adag oo sheegayso inaanu u socono wado wanaagsan markii loo fiiriyo qiimaha howlaha aanu u qabano dadweynaha ku nool Islington.

Desember-tii na soo dhaaftay waxaanu casuunay Inspektorada Guryaha si ay noo fiiriyaan inaanu ku socono wadada saxda ah iyo haddii loo baahan yahay in aanu sii hagaajino howlaha aanu qabano. Si ay caawinaad uga helaan gaaritaanka go'aankoodana waxay la hadleen dhowr ruux oo ka mid ah macaamiisheena iyo kooxo ka tirsan dadka guryaha degan iyagoo wax ka weeydiiyay fikradaha ay ka qabaan guryaha. Warbixintoodiina waxay naga caawisay sidii aanu ku ogaan lahayn waxyaabaha muhiimka u ah waxa nalaga doonayo inaanu qabano sanadka soo socda!

Inagoo rajeeynayna in inspektoradu heleen in ay HFI qabato howlo aad u fiican, laakiin ogolaanshada ugu fiican ee aanu doonayo waa midka macaamiisheena.

Sanadkii 2006, waxaanu qaadnay daraasada ka raali ahaansha howlaha aanu u qabano macaamiisheena, iyo fikarada ah ka qabaan sida aanu howlaheena ugu qabano dadka guryaha degan. 64% waxay sheegeen inay aad ugu faraxsan yihiin howlaha aanu u qabano. Midaasi waxay kor u dhaaftay 52% ee sanadkii 2004. Raali ka ahanshada howlaha dayactirka ee aanu qabanay waxa uu kor ugua kaca kii sanadka 2004 48% isagoo noqday 65% sanadkii 2006. Waxaa sidoo kale jira darajooyin sare oo ah:

- Raali ka ahaanshada guud ee guryaha 70%
- Helitaanka Shaqaalaha HFI 70%
- Wargelinta Dadka guryaha degan 75%
- Soo codsashada dayactirka 80%
- Raali ka ahanshada guud ee nolosha guryaha 88%

Raali ka ahaanshada howlaha guud ee aanu qabano kor ayuu dhinac kasta ugu kacay sanadihii tagay:

Xadka Ka raali ahaanshada	2002	2004	2006
Howlaha Milkiilayaasha Guryaha	41%	52%	64%
Fursahada looga soo qeyb galo	26%	38%	53%
Howlaha Dayactirka	-	48%	65%
Wargelinta Dadka Guryaha degan	-	63%	74%
Xisaabinta Fikradaha Dadka	-	64%	75%

"Natiijada Daraasaadka laga qaado dadka degan guryaha waa cabirka ugu fiican ee hagaajinta howlaha iyo waxaanu aad ugu mahad naqaynaa macaamiishii ka qeybgashay aruurinta daraasaadkaas", ayuu yiri Eamon

McGoldrick, oo ah Gudoomiyaha HFI. “ Hagaajinta Howlahaas ka muuqata waxay ku tusayaan howlaha wanaagsan ee ay shaqaalaheenu qabteen sanadkaan kale oo isbedel ah iyo waxaan jecelaanlahaa inaan fursadaan idiinku soo gudbiyo mahad celin ay idiin soo direen labada Gudoomiye iyo Kooxda Maamulka Sare ee Guryaha” .

Hagaajinta Howlaha

La Socoshada
Guryaha Islington (HFI) waxay ka jawaabeen telefoon tiradiisu ka badan tahay 304,000 oo mar sanadkii naga soo tagay oo laga soo wacay xarunta telefoonada ee HFI, kaasoo ah kor u kac gaaraya 20% ee sanadkii hore. Habkeena ka jawaabida telefoonadu waa inaanu uga jawaabno telefoonka macaamiisheena marka uu dhaco lix mar gudaood iyo waxaanu sidaas yeelnaya sanakii naga tagay 95% telefoonadii naloo soo diray. Midaasina waxay u dhigantaa howlaha shirikadaha wanaagsan, laakiin wanu sii hagaajin doonaa howlaha aanu qabano.

Waxaa sidoo kale nagu soo booqday xarunteena dad gaaraya 50,000 oo booqasho ku yimid sanadkii tagay xafiiska guryaha laga maamulo, kuwaasoo in ka badan labo meelo sadex meel ay qabeen su'aalo ku saabsan caawinaada guryaha. La bilaabo Abriil 2007 waxaa howshaas maamulka guryaha Islington lagu qabtay afarteena xafiis ilaa iyo 4000 wado guryaha ku yaalana waxaa maamula Partners for Improvement in Islington iyadoo ay hayadaasin qeyb ka tahay maalgelinta shaqsiyanka e degaanka ka socota.

HFI Waxaa la gudoonsiiyay abaal marinta ugu sareeysa ee howlahiii macaamiisha ay u qabatay sanadkii 2006.

Dayactirka
Howslaha ugu muhiimsan ee ay macaamiisheenu noo sheegeen waa howsha dayactirka dhismayaasha. Sandkii 2006/07 Hayada saaxiibkeena ah ee maamusha guryaha degaanaka ee loo yaqaan Kier Islington waxay qabatay howlo dayactir oo gaaraya 69,748. 84% howlahaas dayactirkana waxaa la dhamaystiray booqashadii koowaad iyo in kow 99% waxaa lagu qabtay waqtigii aanu ugu talo galnay.

Waxaanu dayac tirnay makiinadaha gaaska kululeeyay 99% guryaha oo dhan inta kale oo ka hartayna waxaanu ka qaadnay tilaabo sharci ah.

Waxaanu hagaajinay xaalada guryaha maran ee aanu ijaarayno iyo marlabaad waxaanu ka mid noqonay 10% hayadaha guryaha maamula ee ugu fiican wadanka inagoo ku ijaarna guryaheena qiyaas ahaan 24 casho gudahood. Midaasina waxay badbaadinaysa ijaar fara badan, iyo lacag dib loogu maal gelin karo howlaha, iyo ka dhigaysa maquul in la dhiso guriyo cusub sida ugu dhaqsaha badan.

HFI waxay kaloo bilabeen abaal marin cusub oo la siiyo dadka guryaha degan markii ay guuraan. Abaal marintaas oo siisa dadka £150 markii ay gurigii ay ka guureen uga tagan asagoo nadiif ah.

Ijaarka
HFI ijaarka ka maqan ahada waxa uu gaarayaa £902,798 ilaa iyo bishii maarso sanadkii tagay iyo ijaarka lagu leeyahay dadkii horay guryaha u deganaan jiray waxaa hoos loogu dhigay in ka badan £2m.

Waxaanu si aad ah iskugu daynaa inaanu caawino macaamiisheena markii ay dib ula soo dhacaan ijaarka bixintiisa. Waxaana ay ujeedadeenu tahay in aanu kor u sii qaadno qiimaha ijaarka ee aanu soo aruurinayno iyo sidoo kale aanu isku dayno inaanu dadka

intiisa badan anau ku hayno halka ay degan yihiin iyadoon laga saarin. Arintaasna si aanu wax ugaqabano waxaanu sameeynay qof u qaabilsan caawinaada dadka oo xafiiskeena fadhiya, mudadii sanadkii tagayna waxaa uu alan u sameeyay dadweyne gaaraya ilaa iyo 600 oo loo qabtay howshaas bilaashka ah, si qubaranimo ku jirtana loogu qabtay oo ka madax banaan xafiiska welferka. Macaamiishuna waxay howshaas ka heli karaan haddii ay la hadlaan Sargaalka Dib u Soo aruurinta Daqliga ama La Taliyaha Maamulka Guryaha.

Ku guuleeysashada howshaasna waxaa laga arki karaa soo aruurrinta deyntaas. Sanadkaan deynta dadka lagu leeyahay hoos ayay si weyn ugu dhacday iyo waxaanu guryaha ka saarnay dad gaaraya 49 ruux kaliya halka aanu guryaha ka saarnay sanadkii ka horeeyay dad gaaraya 136 ruux.

Guryo Fiican

Barnaamijka guryaha Fiican, midkaasoo hada si buuxda u socda, waa wax ka bedelida guryaha iyo nolosha. Sanadahii 2006/07 waxaanu qarash garaynay miisaaniyad gaaraysa ilaa iyo £102m oo lagu qarash gareeyay hagaajinta guryaha iyo soo gaarsiinta xadka nolol wanaaga ee ay dowladu u dejisay inay guryuhu ahaadaan. Ilaa iyo intii uu barnaamijku biloowday Maamulka Guryaha ee Islington (HFI) waxay dhamaytireen:

- 7499 Kushiin
- 4864 Musqulood
- 8273 Hagaajin korontada
- 4930 Daaqadood oo la cusboonaysiiyay ama la badalay

Isku geyna waxaanu hagaajinay 14,000 oo guri, laakiin waxaa weli jira kuwo badan oo wax ka qabasho u baahan – shaqada barnaamijkan ee sanadka 2009 waxay noqon doontaa in la hagaajiyo guryo gaaraya ilaa iyo 5067 dhismoyaal!

Raali ka ahaanshada howlahaasina waa mid sare oo gaaraya 92% dadka guryaha degan ah iyo 70% dadka iska leh hantida guryaha ayaa aad ugu faraxsan howsha loo qabtay.

Maxaad dhahday adigu?
Les iyo Vera Hyde, oo kushiin cusb snadkaan loo sameeyay, ayaa noo sheega:

> Waxay tageen komputerka oo ay ku diyaariyeen sida uu u ekaan doono. Waxay na siiyeen doorashooyin aanu ku kala doorano midabka iyo taylka dhulka ee aanu doonayno. Midaasina waxay ahayd mid aan caadi ahayn. Anagay noo habeeyeen habka aanu doonayno, waxaan ka wareejiyay mashiinka dharka lagu dhaqo meeshii uu yaalay, waayo raali kuma aanan ahayn meeshii hore ee uu yaalay. Waa shaqadii iigu wanaagsaneeyd e waligeed la ii qabto!

Sonia Marshall, hoooyo mashquul ah o eh sadex caruura, ayaa iyana tiri:

> Anigu aad ayaan ugu faraxsanahay. Anigu hada waxaan kushiinkeyga ku karsadaa cunto fara badan aad ayaana u isiticmaalaa. Hada waa la casriyeeyey waana la weyneeyay waxana uu u eg yahay inuu yahay qolka qoysku iskugu imaado, isku imaadka qoyskuna hada farxad ayuu leeyahay – waana mid farxad leh in inta la joogo. Shaqaalhiii ii sameeyay kushiinku waxay ahaayeen kuwo qibrad sare u leh howshii ay ii qabteen iyo qadarin leh, waa nadiifiyeen kushiinka markii ay howshooda dhameeystaan maalin walba inta aysan ka tagin ka hor iyo ka dib marka ay hoehsa ku soo noqdaanba.

Waa sidee dadka hantida leh?
Shaqada siyaaday iyo maalgelinta guryaha dadku degan yahay ayaa waxay keentay in dadka hantida leh lagu dalaco qarash badan oo la xariira shaqada la qabtay oo mararka qaarkood uu biilkaasi aad u fara bato. Hasa ahaatee, Tirada dadka iska leh hantida ee loo diray biilka weyni waa tiro yar marka loo ego tirada dadka hantida leh ee loo biray biilasha guud ahaan.

	2005/06	2006/07

Tirada guud ee milkiilayaasha biilka loo diray.	1519	2170
Biilka ugu sareeya	£41,500	£27,800
Biilasha £30,000+	35 (2.3% dadka milkiilayaasha ah loo diray	Ma laha
Isku celcelinta biilka milkiilayaasha	£6,000	£4,800

Si looga caawiyo milkiilayaashu sidii ay biilashaas ku bixin lahaayeen ayaa HFI waxay sameeysay hab lagu dheeraysan karo bixinta biilkaas iyo deymo bixinta biilasha a xarira oo leh kala doorasho lacagtaas lagu yelanayo guriga taasoo u ogolaanaysa in kounsilku lacagtaas la soo noqdo marki gurigas la gado.

Bulshooyin Nabad Gelyo Leh

Waxaanu la shaqeeynaynaa bulshada si lagu hubiyo in dadweynuhu helo nabadgelyo iyo nolol wanaagsan oo leh meel ku haboon nabadgelyada oo lagu noolaan karo.

Kooxda Ka Jawaabida ASB
Sanadkii 2006 Guryaha Islington (HFI) waxay sameeyeen kooxda Edaabta Dhowrta (Antisocial Behaviour (ASB)) ee shaqeeysa Saacadaha shaqada wixii ka baxsan. Iyagoo si hoose ula shaqeeynaya Booliiska degaanka deriska, Kooxda ka Jawaabida ASB waxay ilaaliyaan guryaha iyo meelaha lagu yaqaan inay denbiyadu ku badan yihiin.

Waxay sidoo kale xaliyaan dacwadaha ka yimaada dhawaaqa dadka deriska ah, doodaha ka dhaxeeya deriska, qashinka iyo qaadida baabuurta la dayacay.

“Waardiyayaashu waxay ka shaqeeynayaan sidii ay ku hubsan lahayeen in dadweynaha guryaha degani ay ku ogaan lahaayeen inuu jiro qof ka taxadaraya wanaagooda oo ilaalinaya habeenkii guryahooda,” ayuu yiri Siobhan O’Donnell, maamulaha kooxda waardiyaha. “ wardiyayaashu wxay raadinayaan sidi ay ku disi lahaayeen aqoon wanaagsan o ay u yeehsaan deriska degaanka iyo uga qeybgelin lahaayeen bulshada iyo hayadaha ku lugta leh inay wax ka wada qabtaan dhibaatooyinka edaab darada ee bulshada ka soo horjeeda ASB ee ka careeysiinaya dadka degan guryaha.”

Dadka Dahlinyarada ah
Waxaanu ogsoon nahaya mihiimada ay leedahay tayo wanaagsan oo ay yeeshaan goobaha dadka dhalinta yari ay ku cayaaraan si ay iskaga ilaaliyaan ASB. Barnaamijka lagu magaacbo The Sports Access for Everyone (SAFE) ayaa caawinaya inuu yareeyo dhibaatooyinka dadka dhalinta yar ee ASB ee degan guryaha kaasoo sameeya mudada xiliga xagaaga howlo la xariira cayaaraha iyo tartanada dadka dhalinyarada ah. sanadihii 2006/07 1120 oo dhalin yaro ah ayaa ka qeyb galay howlaha cayaaraha iyadoo ay ku jireen dhalinyaradaasi young 336 gabdho iyo haween yar yarba. 54 kale oo ka mid ah dhalinyaradaasna waxaa la siiyay shahaadooyinka aqonsiga cayaaraha qaranka iyo maamulka cayaaraha ah.

Barnaamijku waxa uu ku guulaystay abaal marinta qaranka ee ALMO ee howsha ugu fiican ee bulshada. Laakiin waa dadka dhalinyarada ah ee ka qeybgalay barnaamijka fikrada la doonayo:

> Haddii aanan cayaaro hesain waxaanu ku jiri lahaynguryaheeena. Cayaaruhu waa farxad waana cafimaad.
>
> Haddii aanu jiri lahayn barnaamijka SAFE ma aanan haysan lahayn koox cayaarta kubada cagta ee basketball-ka, marka waxaan ula jeedaa anigu ma aanan heleen eel aan aado, marka banaankaan iska tagnaan lahaa.

La xariirkeena Arsenal Football Club (AFC), waxaanu sidoo kale sameeynay urur ay wadaagaan HFI iyo AFC oo ka shaqeeya mustaqbalka dhalinyarada degaanka. In ka badan 300 oo dad dhalinyaro ah ayaana isku qoray barnaajikaas oo degan dhimayaasheena. Kaasoo bixiya barnaaijyo caawinaad ah oo ka dhaca kalaabyada iskuulka ka dibta ah, galaasyada kombuterada iyo tababarada kubada cagta oo ay maamulaan tababarayaal qbrad u leh cayaaraha.Sanadaha soo socdana barnaamijkaasi

kor ayuu u sii kici doona, iyadoo barnaamijkaas la gaarsiin doono dhamaanba dhismayaasheena oo dhanba, xataana laga yaaba inuu gaaro heerka Charlie George.

Qadarinta
July 2007 HFI waxay saxiixi doonaan hesiiska loo yaqaan Respect Standard for Housing Management. Habkaasina waa habka ay dowladu u dejisay in la gaarsiiyo howlaha qadarinta degaanka waxana uu si toos ah u quseynayaa dadka iska leh guryaha. Habkaasina waanu ku soo gaarsiin doona isagoo laguna xisaabtami doono sida aanu u qabano xalinta dhibaatooyika la xariira xaga edaabta bulshada ee ASB.

Dhagaysiga Qof Kasta

Fikradaadu waa mid aad muhiim ugu ah sidii aanu ku ogaan lahayn howlaha ad doonayso in loo qabto bulshada ku nool degaanka guryaheena,, sidaas la adligeed waxaanu si aad ah uga shaqeeynay sidii aanu ku heli lahany fikrada bulshada degaanka.

Waxa aanu og nahay

- Dadka degan guryuhu waxay ku lug leeyhiiin sameeynta go'aanka maamulka guryaha iaygoo ka mid ah gudiga. Kaasoo laga sameeyay xubanaha guryaha degan, iyo labo gudi hoosaad, kuwaasoo laga soo doorto dadka degaanka degan iyo Ururka Dadka Degaanka Degan (TRAs).
- Xafiisk kaska oo degaanka ka mid ah waxa uu leeyahay qof la taliye ah oo laga soo doortay ururka TRAs ee degaankaas. Xubnahaas la soo doortayna waxay dib warbixintooda ugu soo gudbiyaan HFI wax qabadkeeda guud.
- Dhismayaasha gudahoodana, shaqaalaheena ayaa maalin walba si toos ah ula xariiira hayadaha degaanka degmada. Waxaanu sidoo kale la shaqeeynaa Ururka Milkiilayaasha Guryaha (FITA) si lagu hubiyo in la helo fikrado kala duwan oo balaaran.

September 2006, dadka guryaha degani waxay ka soo qeyb galeen shir looga wada hadlayay waxa ay dadka halkaani degani jecel yihiin in aanu u qabano iyo sida aanu ku hagaajin karno howlaha aanu u qabano bulshada degan halkaan. Dhowr waxyaaboo oo ka mid ah fikradihii aanu halkaas ka helnayna waxa ay hada ku jiraan waxyaabaha anau doonayno inaanu qabno sanadaha 2007/08. Waxaanu istimaalnay fikradii aanu ka helay daraasaadkii aanu ka qaadnay dadka degan guryaha iyo wixii kaloo talooyin ah e ay noo soo jeediyeen, rumayso ama ha rumaysaninee – waa hab qaali ah oo aanu ku ogaano waxa ay dadku doonayaan in loo qabto ama wax looga badelo,

Waxyaabaha Soo Socda

Sanadaha 2007/08 waxaanu qaban doona howlahaan iyo:

- Qaadi doonaa daraasaad aanu ku tagi doono albaab kasta oo degaanka
- Bilaabi doonaa Waraaq Heshiis Cusub (new leaseholder forum)
- Cusboonaysiin doonaa xiriirka naga dhaxeeya FITA

Sidoo kalena, qof kasta waqti uma uu hayo uu ku yimaado shirarka ama uu qeyb uga cayaaro xubnimada TRA. Sidaas daraadeed, sanadaha soo socda waxaanu isku dayaynaa inaanu sameeyno habab kale oo aanu u helno fikarda dadka degaana oo idil.

- Waxaanu sii balaarin doona xiriirka naga dhaxeeya hayadaha kale ee bulshada iyo hayadaha iska wax u qabsashada ee degaanka si aanu ku helno talooyin aanu ku wanaajino howlaha aan bulshada u qabano.
- Waxaanu sameeyn doona diiwaan geliye lagu qoro dadka degaanka degan ee doonaya in la maqlo fikradooda si ay nogu sahlanaato inaanu la xariirno si aanu ku helno aragtidooda kku aadan waxqabadja HFI iyo waxa ay jecel yihiin inay ka talo bixiyaan.

Sanadaha 2007/08, Gudiga maamulka HFI waxay doonayaan inay dhagaystaan hayadaha mar kasta hagaajiya howlaha ay bulshada u qabtaan.

Guryo Cagaar iyo Nadiif ah

Guryaha Degmada Islington (HFI) waxay si aad ah sanadkaan uga shaqeyeen sidii ay dhismayaasha degmada uga dhigi lahaayeen kuwo dhir cagaaran leh oo nadiifna ah, lehna beero la daawan karo.

Baaritaanka Dhismayaasha
Shaqaale cusub ayaa la sameeyay May 2006. Sargaalka Qiimeynta Tayada Quality Assurance Officers (QAOs) ayaa hada waxa uu sameeyaa baaritaan labadii habeenba mar hada isagoo soo kantroola dhismayaasha ku yaal degmada meelaha ka dhaxeeya bulshada ama ay iskugu yimaadaan, waxaa intaas dheeraad ku ah in, lagu casuumo dadka guryaha degan, wakiilada ururka milkiilayaasha guryaha, wakiilada ka socda kawsalka ayaa iminka ka qeyb qaata kontroolka dhismayaasha sedexdii biloodba mar. Waxyaabaha ay soo baarayaana waxaa sameeya dadka guryaha degan. QAO-ga iyo qofka ilaalinaya dhismayaasha waxay hada awood u leeyihiin inay meelaha dadku iskugu yimaado ama ka dhaxeeya ay si toos ah dayactirkooda u weydiisan karaan HFI. Midaasi macnaheedu waxa weeye in hada dayactirka meelahaas si dhaqso leh loo soo sheegayo loona sameeynayo.

Nadiifinta
Afar mashiin oo cusub oo kuwa wadooyinka nadiifiya ayaa bilaabay inay nadiifiyaan wadooyinka degnadaan Islington sanadkii tagay. Waxaa laga yaaba inaad mid aragtay nadiifinaya wadooyinkeena sitimaankiiba labo mar. Kuwani waxay siiyeen qofma wadada ka masuulka ah waqti uu ku qabtto howlaha kale ee dayactirka yar yar ah.

Sadax kooxood oo nadiifinta ah ayaa hada masuul ka ah nadiifiyaan waxyaabaha lagu qoro darbiyada (graffiti) iyo isticmaala qalabka biyaha ee wax lagu nadiifiyo. Waxyaabah cayada iyo danbiyada ah ee lagu qoro darbiiyada hada waxaa laga tirtiraa maalinta labaadba. Sidoo kale qashinka waxaa hada la aruuriyaa isla maalinta labaadba (sida kurasta iyo joodariyada ay dadku sika soo tuuraan) iaydoo hada laga wada aruuriyo degmada oo dhanba si loo ilaaliyo in qshinku u ku bato degaanka guryaha la degan yahay ku yaal.

Cagaarinta degaanka
Waxaanu si aad ah u danaynaa sidii aanu mar labaad u istcmalai lahayn alaabta aan tuurayno. Alab ka aruurinta albaadana dib ayaa mar kale logu sii wada dheereeyaya dhaamaanba dadka degan degaanka degmada oo dhan iyagoo qashinka keena dhismahaan ama dhismayaal yaryar oo ku yaal degaankooda, Dadka degan guryaha ku yaal jidjana waxay ka faa'iidaysan karaan qashinka aruurinta Sanduuqa Cagaaran ee qashinka dib loo isticmalai karo. Midaaso ku ogolaanaysa inaad ku rido qashinka ah xaanshida, dhalada, dharka, iwm taasoo sitimaankiiba mar laga soo hor aruuriyo guryaha albaabkooda, Dhamaanba dadka degan guryaha degmada ee qashinka laga hor aruuriyo waxaa loo soo diri doonaa cadeeyn ay sidaasi ku qoran tahay, cadeeyntaaso siin doonta warbixn tafatiran oo sheegaysa howlaha loo qabtay iyo meelaha qashinka la geeyo. Ilaa iyo June 2006 barnaamijka dib u

isticmalida qashinku waxay waceen 23,000 oo qoys igaoo la hadla dad ay tiradiisu dhan tahay 10,000 oo qofood.

Howsha beeraha
Inagoo la shaqeeynayna shirikada Groundwork, HFI waxay mar labaad bilaabeen oo ay dhamaytireen dhowr barnaamij oo hagaajinta beeraha ah sanadkii tagay.

Guryaha Branston iyo Rollit guryaha ku yaala bulshadooda waxaa laga caawiyay sidii loo beeri lahaa beerta maalintii ee ku taala dhulka ku yaal guriga Rollit House. £35,000 ayaa ilaa hada loo qorhseeyay howsha diyaarinta iyo qorshayntuna wey dhaceen iyadoo muhimada koowaad la siinayo sidi loola tashan lahaa dadka deagn degaankaas loguna qorsheeyn lahaa abuurida beerta ku taal halka dhismaha laga soo galo.

Sanadkii tagay waxa uu ahaa sanadkii labaad ee uu furnaa dhulka banana ee la hagaajiyay eeku yaal dhulka dhismaha Mayville Estate, anagoo tixglin weyn siinay danbiyada iyo nabadgelyada. Dadka guryaha degan waa lala tashtay iyo dib u hagaajintii waa la dhmaystiray. Qadadaii furitaankana waxay dhacday May 2007.

Labo meelood oo caruurtu ku cayaarto ayaa dhismahooda lagu soo dhamaystiray dhismaha jidka Brecknock Road estate iyadoo loo isticmaalay miisaaniyad gaaraysa £153,000 oo ahayd lacag laga soo aruuriyay dadweynaha degan iyo kuwa ku leh guryaha degaanka wadada Brecknock Road Estate Tenants iyo Residents Association (BRETRA),oo uu hogaaminayay Judith Williamson. Banaamijkaasna waxaa aad ugu mahad naqay National Federation of ALMOs iyadoo la siiiyay abaal marinta ah barnaamijka ugu fiican ee ay dadweynuhu hogaamiyeen.

Qiimeynta Dadweynaha Guryaha Degan

Waxaanu ognahay in dadka guryaheena degani ay ka kala yimaadeen dhaqano kala duwan iyo ay leeyihiin fikrado kala duwan – waxaanu u qaban doonaa howlo soo buuxiya baahidoodaas kala duwan. Midaasina waa mid aad muhiim u ah haddii aanu doonayno inaanu wax ugu qabano bulshada oo dhan si wada siman oo daacadnimao leh.

Sanadkii 2006, waxaaanu dhamaystirnay wajigii koowaad ee howshii qoritaanka qolooyinka kala duwan (diversity mapping) si aanu wax badan uga ogaano noloshaada. Waxaanu wax kaa weydiinay wadankii aad ka timid, luqada aad ku hadasho iyo haddii aad wax curyaaniimo ah leedahay. Waxaanu u doonaynaa wararkaas sidii aanu kugu qaban lahayn shaqada ugu fiican ee maquulka ah. Tusaale ahaan, waxaanu ku siin karnaa warar ku qoran luqadaha aan ahayn ingriiska haddii aad u baahato. Wararka aanu aruurinayno waxay naga caawini doonaan sidii aanu ku heli lahayn dadka u baahan koobi ku qoran luqad kale.

Waxaanu sii wadi doonaa aruurinta warbixintaas halkii aanu awoodno inaanu ka helo si aanu howlaheena ugu ekaysiino sidii wax looga qaban lahaa baahida kala duwan ee bulshada. Tusaale ahan waxyaabahii aanu horay u soo qabanay waxaa ka mid ah:

- Waxaanu siinay nalal daarma markii ay qaac dareeman oo loo sameeyay dadka dhagaha la' ama dhagoolayaasha ah ee dadan guryaha degaanka. Waxaanan ku guuleeysanay abaal marin qaas ah oo ay bixisay London Fire Brigade oo ahayd hagaajinta howlaha ka badbadinta dabka ee bulshada degaanka lo qabtay, qaasatan howsha loo qabtay dadka dhagoolayaasha ah.

- Waxaanu smaeeynaa baaritaanka dayactirka guryaha sanadkiiba hal mar ee dadka indhoolayaasha ah guryahooda aanu ku tagno, kuwaasoo laga yaabo inaysan u jeedin meelaha dayactirka u baahan.

- Waxaanu la kulanay dad dhalinyaro Soomali ah oo aanu ka codsanay inay noo soo baaraan waxyaabahaan iyagoo bulshada u qabtay cayaaro iyo fursado kale.

Wararka aanu soo aruurino waxay kaloo naga caawinayaan sidii aanu ku ogaan lahayn in bulshada degaanka oo dhan si cadaalad ah o wada siman in wax loogu qabto marka anu bixinayno warbixnta furaha u ah howlaha loo qabto dadka guryaha iska leh. Sanadkii naga tagay waxaanu baaritaan ku sameeynay habka dacawadaheena iyo bixinta ijaarku inay yihiin kuwo si cadaalad ah oo siman loo qabto. Warbixnadaasna waa la darsaa oo la baaraa iyo haddii ay muhiim noqoto waxaa laga qaadaa talaabo. Sanadkaan 2007 waxaanu baaritaan ku sameeyn doonaa sida lo qabto howlaheena dayactirka iyo sida loola dhaqmo dacwadaha dhibaatooyinka bulshada ka soo horjeeda in loo xaliyo si sinaan leh.

Anagoo la shaqeeynayna Kousilka iyo shirikada Kier Islington, waxaanu caawinay inaanu bixinoin wax yar ka yar 300 dayactir oo aanu ku sameeynay guryaha ay ku nool yihiin dadka curyaamiinta ah sidaa inaanu u sameeynay

jaranjaro iwm. Waxaanu sidoo akle sameeynay boqolaal dayactiro yar yar ah sida sameeynta mesha gacata lagu qabsado iwm. Midaasina waxay nolosha u sahlaysaa dadka curyaaminta ah mararka qarkoodna u sahla inay si xorimo leh ugu sii noolaadaan gurigooda.

Waxyaabaha kale ee la qabanayo sanadaha 2006/07 waa:

- Shaqada aanu la qabanay council-ka ayaa macnaheedu waxa weeye inaanu gaarnay heerka xadka 3-aad ee xadka wada sinaanta, Midkaasoo ah xadka ay dowladu u dajisay in howl u qabashada bulshooyinka kala duwan ee dowladaha hoose ay gaarsiisnaadaan.
- Waxaanu ka caawinay council-ka sidii uu ku soo buuxin lahaa howsha xadka laga doonayo ee ay u dajiyeen Gudiga Wada Sinaanta Midabada Kala Duwan ee Guryaha Bulshada.
- Waxaanu qabanay balan qaadkii ahaa inaau ka dhigno xafiisyadeena kuwo soo buuxiyay waxyaabaha laga doonayo ee ku saabsan xada ay dowladu u dajisay Ka hortaga Midabtakoorka Curyaamiinta (Disability Discrimination Act) iyo waxaanu sidoo kale sidaas ka dhigi doonaa goobaha ay bulshau iskugu timaado sanadaha 2007/8.
- Waxaanu leenahay wada xiriir fiican oo naga wada dhaxeeyay hayadaha bulshada iyo shaqsiyaadka voluntiyeerka ah iyo sidoo kale waxaanu sii balaarin doonaa midaas sanooyinkan 2007/08. Tusaale wanaagsan waxaa midaan ah wada shaqeeyntii wanaagsaneeeyd ee aan la yeelanay hayada Disability Action ee Islington sanadkii tagay.
- Waxaanu sii wadi doonaa inaanu mar kasta dib u qiimayn ku sameeyno howlaha aanu qabano anagoo ka soo bilaabayna shaqalaheena marka la qorayo iyo waxaanu sidoo kale hubsan doonaa in warbixnadaas oo dhanba loo soo gudbiyo gudiga maamulka hayada.

Hogaaminta

Waxaa na soo maray sanad kale oo howlo fara badan aanu qabanay haddii aanu nahay Gudiga Maamulka Guryaha Islington (HFI) waxaanan sii sagootinay iyo soo dhaweynay sadax ruux oo uu kaawnsilku ka badelay gudiga maamulka iyo sadex ruux oo uu u magacaaabay in laga bedelo gudiga maamulka guryaha oo kala ah, Euan Cameron iyo Steve Burd iyo sidoo kale Jyoti Vaja, oo doonaysa inay sanadkan isku taagto doorashooyinka sanadka ee duqa degmadaan Islington.

Isbedeladaasi waxa ay kaawnsilka u ogolaadeen inay u soo magacaabaan boosaskoodii John Gilbert, Paula Belford iyo Barbara Sidnell oo ku soo saa'iday gudiga maamulka guryaha.

Isbedelka kale waa soo dhaweeynta Caroline Jenkinson taasoo ku soo dartay waayo aragnimadeeda dheeraadka ah ee ay u leedahay howlahaan iyadoo xubin cusub ka noqon doonta gudiga maamulka badeli doontana Richard Rosser.

Mudadii sanadka gudahiiisa ahayd xubnaha gudigu waxay baaritaano ku sameeyeen hababka lagu hagaajin karo wax qabadka shirikada iyo sidii maamulayaasha HFI loogula xisaabtami lahaa waxqabdkooda ku aadan

shaqada ay masuulka ka ahayeen. Gudigani waxa uu warbixintiisa u soo gudbiyay Gudoonka bishi Abriil 2006 iyo waxyaabihii ay badanaaba ku taliyeen waa la isku af gartay.

Sidii ay weligeed ahaydba, Gudigu waxa u ahaa furaha wadnaha qorsheynta howlaha la qabtay si lagu hubiyo in waxa ay macaamiishu doonayaan iyo muhiimka u ah in ay ka muuqdaan qorshaha la dejiyay in lagu dhaqmo sanadaha soo socda.

Intii uu sanadku socday oo dhan, gudiga maamulku waxa ay sii wadeen inay kor u qaadaan waxqabadka shaqaalaha HFI, iyagoo sidaas u maraya ka qeyb galka meelaha ay bulshadu iskugu timaado iyo habka la wada tashiga ah oo socday mudadii sadexda casho ahayd ee aanu la shirnay bulshada. Sidoo kale HFI waxay markii ugu horaysay qabatay shir u furan dhamaanba dadweynuhu inay ka soo qeyb galaan oo ay su'aalahooda ugu sheegaan gudiga maamulka. Waxaana dhici doona labo shir oo sidaas oo kala sanad kasta.

Kooxda Maamulka Sare ee Gudiga waxay ahaan doonaan kuwo aan is bedelin iyo waxay sii wadi doonaan shaqadii ay qaban jireen ee ahayd hagaajinta howlaha ay qabtaan shaqaalaha HFI, sii badinta ka soo qeybgalka macaamiisha guryaha degan ay ku dhiibtaan fikradooda iyo si lagu hubiyo in kor loo qaado qiimaha lacagta maalgelinta guryaha ah. Dib u eegitaankii ALMO waxaa qaban doona Baarayaasha Audit Commission bisha November waxaana uu noqon doonaa ogaansho aanu ku ogaano inaanu gaarnay meesha aanu doonaynay inaanu gaarno. Dhamaanba shaqaalaha HFI waxay si aad ah u filayaan in natiijada ka soo baxda dib u egidaas ay sameeynayaan Audit Commission ay noqoto mid siisa HFI abaal marinta shaqada wanaagsan ee darajada sadexda xidgood (three star excellent service) ee sanadaha 2007/08.